# SOO-JEEDIN AMAR-DIIDO MAXKAMAD: Waxa lagu sameeyo Waraaqahan Maxkamadda

WAA TIXRAAC KALIYA

Haddii ad ku dhaqaaqaysid soo-jeedin Amar-diido Maxkamad, fadlan tan akhri. Waxay kaa caawin doontaa inad ogaatid waxa lagu sameynayo waraaqahan ama foomamkan maxkamadda.

Marka hore, dhawr talo oo ku saabsan sida loo buuxiyo waraaqaha:

- Markasta istcimaal magacyo sharci oo buuxa, ma ah naaneysyo.
- Teebgaree ama ku qor xuruuf kala go'an oo nidaamsan. Haddii ad heli kartid kombiyuutar waxa ad awoodi kartaa inad waraaqaha ka buuxisid internetka barta ah www.ptla.org/forms.htm
- Haddii ilmo ka mid ah kuwa ku jira kiiskan u qaato, ama qaatay AFDC, TANF, ama Medicaid, koobigaaga waraaqaha maxkamadda boosta ugu soo dir Wasaaradda Adeegyada Bini'aadanka (Department of Human Services) (DHS). Adreesku wuxu ku yaallaa waraaqda. Sidoo kale waa inad tan sameysid haddii ad DHS weydiisatay inay kuu soo ururiso taageerada ilmaha.

## TALLAABADA KOOBAAD: Buuxi Waraaqaha

### SOO-JEEDIN AMAR-DIIDO MAXKAMAD

Qayta ugu sareysa waraaqdan waxa la yidhaahdaa "madaxa waraaqda." Fiiri madaxa waraaqda ee Amarka Maxkamadda ee asal ah oo ka qoro goobta maxkamadda, lambarka galka maxkamadda iyo magaca Dacweeyaha iyo La-dacweeyaha. (Macluumaadkani isma beddelayo. Haddii ad markii hore ahayd La-dacweeye, waxad wali tahay La-dacweeyaha, xiitaa haddii ad tahay qofka xereysanaya Soo-jeedinta hadda.) Haddii aanad heli karin amarkii asal ahaa, waxad nuqul ama koobi ka iibsan kartaa karaaniga.

Calaamadee sanduuqa "Kaliya Taageero Ilmo" haddii taageero ilmo tahay arrinta **kaliya**. Buuxi meelaha banaan ee kale ee waraaqda. Xagga sare ee bogga 2, calaamadee sanduuqyada si ad u muujisid inad rabtid in maxkamaddu soo saarto amar.

Waa inad waraaqdan ku hor saxeexdid Nootaayo Dadweyne. Waxa ad qof Nootaayo ah ka heli kartaa bangi, xafiis adeegyo sharci, xafiiska magaaladaada, ama xafiiska karaaniga maxkamadda.

### YEEDHIS DHEGAYSI KU SAABSAN SOO-JEEDIN AMAR-DIIDO MAXKAMAD

Waa inad isticmaashid waraaqda ad ka heshay karaaniga. Waxa ku yaala saxeexa karaaniga iyo shaambadda oo asal ah. **Ma isticmaali kartid koobi laga sameeyay ama nuqul ku jira internetka oo ah waraaqdan**.

Koobigaree ama qoro madaxa waraaqda ee xagga sare ee bogga ee waraaqdaada **Soo-jeedinta**. Laynka ku xiga, kadib "Ku:" ku qor magaca qofka kale ee arrintu idinka dhexeyso. Kadib calaamadee sanduuqa, si ad u muuhjisid in qofka kale yahay Dacweeyaha ama La-dacweeyaha. Hadda, iska daa qaybta dhexe, ogeysiiska dhegaysiga, oo ha banaanaato. Haddii ad rabtid in qofka kale dukumentiyo u qaato dhegaysiga, ku qor qaybta ku xigta. Laynka ku xiga, calaamadee inad tahay Dacweeyaha ama La-dacweeyaha. Iska daa oo ha banaanaato inta ka hadhsan waraaqda.

### AMAR

Madaxa waraaqda u buuxi sida ad u buuxisay waraaqaha kale. Sanduuqyada waaweyn ku qor adreeskaaga iyo adreeska qofka kale. Inta kale ha banaanaato si Maxkamaddu u buuxiso.

### XAASHIDA KOOBITAANKA

Buuxi **Xaashida Koobitaanka ee Qoyska ee Qarsoodi ah**, ee leh fariimo u gaar ah. Macluumaadkani wuxu karaaniga ka caawinaa inu xereeyo oo la socdo kiiskaaga. Foomkan ama waraaqdan la'aanteed, karaanigu ma oggolaan doono in la xereeyo waraaqahaaga.

## TALLAABADA LABAAD: Xeree Waraaqaha

Karaaniga dib ugu gee waraaqahan asalkooda:

- Soo-jeedin Amar-diido Maxkamad

- Yeedhis ku Saabsan Dheysiga ku Saabsan Soo-jeedin Amar-diido Maxkamad
- Amar
- Xaashida Koobitaanka

Maxkamaddu waxay qaadaa lacag ama ujro si loo xereeyo Soo-jeedintaada. (Haddii soo-jeedintaadu ku saabsan tahay bixinta taageero ilmo kaliya, ma aha inad bixisid lacagtan.) Haddii aanad iska bixin karin lacagta maxkamaddu qaado ama adeegga Sheriff-ka, waxa ad karaaniga weydiisan kartaa waraaqha la yidhaahdo **Codsi in la Galo Hawsho Iyada oo Aan la Bixin Lacag** iyo **Cadeyn Saboolnimo**. Buuxi waraaqahaas oo saxeex. Waa inad Cadeynta ku hor saxeexdid Nootaayo Dadweyne. Kadibna labadaas waraaqadood la xereyso **Soo-jeedintaada**. Garsoore ayaa fiirin doonaa macluumaadkaaga dhaqaale oo go'aamin doona inu kuu banaan yahay "ka dhaafid lacag." Haddii maxkamaddu diido codsigaaga, **waa inad lacagta ku bixisid gudaha 7 maalmood.** Haddii Maxkamaddu haa kaga jawaabto codsigaagu, waad sii wadan kartaa oo xereysan karaa waraaqahaaga adiga oo aan bixin lacag.

Koobi ama nuqul ka samee **Soo-jeedintaada** kahor inta aanad asalka siin karaaniga. Karaanigu wuxu waraaqahaaga tusi doonaa Garsoore. Haddii ad si sax ah u qabatay wax kasta, Maxkamaddu waxay taariikh iyo wakhti u dejin doontaa dhegaysi oo saxeexi doontaa **Amarka**. Karaanigu wuxu kuu soo celin doonaa **Wargalinta Imaansho Maxkamad** iyo koobiga **Amarka** oo saxeexan. Karaanigu wuxu warqadda **Yeedhista** kuugu buuxin karaa wakhtiga dhegaysiga iyo goobta maxkamadda. Haddii aan laguu buuxin, macluumaad ku dar **Yeedhista** inta ad ka soo guurisid **Amarka**.

## TALLAABADA SADDEXAAD: Gacanta ka Saar Waraaqaha

Hadda waa inad waraaqaha "gacanta ka saartid" dhinaca kale ama qofka kale. Marka hore, laba koobi ka samee **Yeedhista** (oo la socdaan koobiyada **Soo-jeedintaada** iyo **Amarka**). Hayso hal koobi. Asalka Yeedhista iyo koobiga kale sii sheriff-ka si gacanta looga saaro.

Waraaq ku weydiiso, ama qof ahaan, weydiiso xafiiska sheriff-ka in **Wargalinta Imaansho Maxkamad**, **Soo-jeedinta** iyo **Amarka** loo geeyo qofka kale. Bixi adrees guri. Haddii ad u maleynaysid inay dhib noqon doonto in la helo qofka kale, bixi adrees shaqo. **Xusuusi ku-xigeenka sheriff-ka in waraaqaha gacanta laga saaro ugu yaraan 10 maalmood kahor taariikhda dhegaysiga**.

Haddii aanad helin "lacag ka dhaafid" (fiiri kor), waxa u xafiiska sheriff-ku kugu soo dalici doonaa lacag ku saabsan adeeggan (qiyaastii $15-$30). Haddii Maxkamaddu ku siisay lacag ka dhaafid, sheriff-ka sii koobiga Amarka Maxkamadda si aan lacagta adeeggan laguugu soo dalacin.

## TALLAABADA AFRAAD: Xeree Wargalinta Imaansho Maxkamad

Kadib marka qofka kale "gacanta laga saaray," waxa ad karaaniga maxkamadda boosta ugu soo diraysaa ama gacanta uga keenasaa **wargalinta Imaanshaha Maxkamadda**, **Soo-jeedinta** iyo **Amarka** ad dib uga heshay ku-xigeenka sheriff-ka. Garsoore ma dhegaysan karo kiiskaaga illaa kan la xereeyo, taasoo muujinaysa in qofka kale "gacanta laga saaray".

## TALLAABADA SHANAAD: Dhegaysiga Maxkamadda

Kani waa dhegaysi maxkamad oo rasmi ah. Garsooruhu wuxu dhegaysan doonaa dhinac kasta. Adiga ayaa isku marag-furi kara, waxad keeni kartaa markhaatiyo, oo keeni kartaa dukumentiyo. Waxa la raaci doonaa xeerarka maragga iyo habraaca.

Isu diyaari dhegaysi inta ad qorsheysid waxa ad u baahan tahay inad tidhaahdid. Waxa lagaa rabaa inad cadeysid in dhinaca kale ama qofka kale ku fashilmay ama diiday inu raaco amarkii maxkamadda ee hore. Sidoo kale waa inad muujisid, adiga oo "keenaya cadeyn cad oo la rumeysan karo," in qofka kale awood u leeyahay inu addeeco waxa Maxkamaddu amartay. Wakhti ku tag dhegaysiga, oo isu diyaari.

WAATIXRACKAL WA